Xuquuqaha iyo Mas'uuliyadaha Gargaarkaaga Lacagta Kaashka iyo Cuntada

Your Cash and Food Assistance Rights and Responsibilities

Magaca Macmiilka (Madaxa Reerka)
Lambarka Aqoonsiga Macmiilka

Mas'uuliyadahaaga (Waa In Aad)

- **Ina sii macluumaadka aan u baahanahay si aan u go'aamino haddii aad xaq u leedahay.**
- **Caddeyn ina sii marka loo baahdo.** Waxaa laga yaabaa in aan awoodno in aan kuu keenno. Macluumaadka aad waaxda siiso waxaa ku waajiba xaqiijinta saraakiisha federaalka iyo dowlad-goboleedka. Xaqiijinta waxaa ka mid noqon kara xiriirrada la socoshada ee ka imaanaya shaqaalaha waaxda oo ay ku jiraan baarayaasha khiyaannada.
- **Macluumaadka loo sheegay Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada** waxaa ay saameyn karaan xaq-u-yeelashada caymiska daryeelka caafimaad ee ay gacanta ku hayaan Maamulka Daryeelka Caafimaadka iyo Health Benefit Exchange.
- **Soo Sheeg Isbeddellada** (t.a. cinwaanka, dakhliga, iwm.) ee uu u baahan yahay WAC 388-418-0005. Soo sheeg kama dambeys 10^{ka} bisha xigta.
- **Iskaashi la yeelo Qaybta Taakulaynta Carruurta (DCS)** haddii aad aqbasho deeqda TANF. Waa in aad DCS ka caawisaa dejinta, wax-ka-beddelka, ama dhaqangelinta taakuleynta carruurta ee cunugga(carruurta) daryeelkaaga ku jira, iyo caddeynta waalidnimada (haddii ay lagama maarmaan tahay) sida uu qabo xeerka WAC 388-422-0005. Waa in aad diido in aad iskaashi la yeelato DCS haddii aad muujin karto in aad hayso sabab wanaagsan oo lagu aamini karo in iskaashiga aad la yeelanayso DCS uu gelinayo adiga, carruurtaada, ama carruurta aad daryeesho halis waxyeello ama dhibaato oo ka imaanaysa waalidka aan carruurta hayn.
- **Codso** oo samee dadaal macquul ah oo aad dakhli suuragal ah kaga helayso ilaha kale marka aad weyddiiso ama hesho gargaar kaash ah.
- **Buuxi warbixinada iyo dib-u-eegisyada loo baahan yahay.**
- **Raac shuruudaha shaqada** ee loogu talagalay gargaarka kaashka iyo gargaarka cuntada.
- **Noo sheeg** haddii aad doonaysid in qof kale oo adiga kaa wakiil ah uu adeegsado gargaarkaaga cuntada.
- **La shaqee dib-u-eegisyadeenna Kantaroolka Tayada ee aan sameyno**
- **U isticmaal gargaarka cuntada** kaliya in aad ku soo iibsato cunto loogu talagalay xubnaha reerkaaga.
- **U isticmaal gargaarka kaashka** kaliya dheefta xubnaha reerkaaga.
- **Waa in aad bixisaa Lambarrada Damaannada Bulshada** (SSN) ama xaaladda socdaalka kaliya ee loogu talagalay dadka codsanaya gargaarka. Haddii aad doorato in aadan bixin SSNs ama xaaladda socdaaalka xubnaha reerka ee aan codsaneynin, dhammaan kheyraadyada iyo dakhliga xubnaha qoyska waa in weli la xaqiijiyaa, haddii loo baahdo, si loo go'aamiyo xaq u yeelashada.

Xuquuqahaaga (Waa in Aan)

- **Aqbalnaa codsiga** ay ku qoran yihiin magacaaga, cinwaankaaga, iyo saxiixaaga ama saxiixa wakiilkaaga idman.
- **Kaa caawinaa buuxinta foomamka DSHS.**
- **Ka shaqeynaa** codsigaaga gargaarka cuntada muddo toddobo (7) maalmood gudahooda haddii aad xaq u leedahay adeegga la dedajiyay.
- **Ku siinaa rasiid** haddii aad mid codsato marka aad dokumentiyada bixiso.
- **Ku siinaa go'aan qoraal ah,** xaaladaha intooda badan, 30 maalmood gudahooda.
- **Waa in aad diidaa in aad la hadasho baaraha Oggaanshaha Waqtiga Hore ee Khiyaannada** (FRED) ee ka socda Xafiiska Khiyaannada iyo Isla-Xisaabtanka. Looma baahna in baaraha aad u oggolaato in uu gurigaaga soo galo. Waxaad weyddiin kartaa baaraha in uu waqti kale soo noqdo. Tani ma saameyn doonto xaq-u-yeelashadaada gargaarka.

Xuquuqahaaga (Waa in Aan) La Sii-wadey

- **Waxaad codsan kartaa dhageysiga maamulka la xiriira** haddii aad diido go'aanka ay waaxda ka qaadatey kiiskaaga. Waxaad sidoo kale weyddiisan kartaa kormeere ama maamule in uu dib-u-eego tallaabada ama go'aanka la isku khilaafay iyada oo aan wax saameyn ah ku yeellan xuquuqaha aad u leedahay dhageysiga maamulka.
- **Waa in aan kugu wargelinaa** xeerka xadka 60-bil ee hoos imaanaya barnaamijka Gargaarka Ku-meelgaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF). Xadkan waqtiga kuma dabaqmo kaalmadaada Cuntada Aasaasiga ah, ama kaalmooyinka daryeelka carruurta.

Waxyaabaha Ay Tahay In Aad Ka Oggaatid Kaarkaaga EBT

- **Ku-takrifalka Dheefaha:** Dheefaha cuntada iyo lacagta kaashka ee la qaybiyo iyadoo la marsiinaya kaarka EBT waxaa ay DSHS siin doonaan taariikhda macaamulooyinka ee halka aad ku adeegsatey dheefahaaga. Waaxdu waxaa ay macluumaadka macaamulada u adeegsan doontaa baaritaannada ku-takrifalka dheefaha gargaarka lacagta kaashka ah ama ku beddelashada dheefaha gargaarka cuntada lacag kaash ah ama waxyaabo kale oo qiimo leh (ka-ganacsi).
- **Beddelka kaarka EBT:** Waxaa laga yaabaa in aan kugu soo dalacno lacag khidmadda beddelka kaararka EBT ah. Ilaali ammaanka iyo bedqabka kaarkaaga EBT iyo lambarkaaga aqoonsiga shakhsiyeed (PIN).
- **Kaararka EBT ee Haraaga Badan Ku Jira:** Haddii aadan isticmaalin dheefahaaga muddo bilo ah waqtigiiba ama ay kuu ururaan haraa badan ka-dib dhowr bilood, waxaa laga yaabaa in aan kula soo xiriirno si aan dib-u-eegis ugu sameyno xaaladaada ama baahida aad u qabto dheefaha.

Waxyaabaha Ay Tahay In Aad Oggaato (Cuntada Aasaasiga ah)

- **Waxaan u dirnaa macluumaadka** ku saabsan shakhsiyaadka codsanaya Cuntada Aasaasiga ah hay'adaha kale ee Federaalka si aan u hubinno in macluumaadka uu sax yahay. Haddii macluumaadka uu wax ka khaldan yahay, shakhsiyaadka codsanaya waxaa laga yaabaa in aysan helin Cuntada Aasaasiga ah. Haddii qofku uu bixiyo macluumaad ay ogyihiin in uu khaldan yahay, waxaa laga yaabaa in dambi lagu soo oogo. Ciqaabaha ka dhalan kara jebinta ula kac ah ee xeerarka Barnaamijka Cuntada Aasaasiga ah (Basic Food) way kala duwanaan karaan laga bilaabo in laga mamnuuco barnaamijka, ilaa ganaax lacageed, ama xabsi suuragal ah.
- **Haddii aad iibiso, isku daydo in aad iibiso, weydaarsato ama aad deeq ahaan u bixiso gargaarkaaga cunto ee aad hesho si loogu beddesho** wax qiime leh sida lacag caddaan ah, daroogo, hub, ama wax kale oo aan ahayn cunto laga helo tafaariiqle oggolaansho leh (ka ganacsi ah), waxaa lagaa mamnuuci karaa in aad hesho gargaarka cuntada muddo ugu yaraan hal sano ah, ilaa iyo xayiraad noloshaada oo dhan xitaa marka ugu horraysa ee lagugu qabto. Xayiraaddan ama ka mamnuucidan ayaa xitaa sii soconaysa haddii aad ka tagto Gobolka Washington oo aadna dheefo ka codsatod gobol kale.
- **Haddii lagaaga baahan yahay in aad ka qaybgasho shuruudaha shaqada Cuntada Aasaasiga ah**, oo aadna ka qaybqaadan weyso, waxaa lagaa mamnuuci karaa muddo hal bil ah iyo ilaa aad ugu hoggaansanto shuruudaha shaqada ee guuldarrada koowaad; saddex bilood ilaa aad ugu hoggaansanto guuldarrada labaad; iyo lix bilood ilaa aad ugu hoggaansanto markii saddexaad iyo waqti kasta oo markaasi ka dambeeya.
- **Waxaa laga yaabaa in lagaa saaro barnaamijka Cuntada Aasaasiga ah** haddii aad jebiso xeerka barnaamijka Cuntada Aasaasiga ah sida lagu qeexay digniinta ciqaabta Cuntada Aasaasiga ah ee ku xusan boggan.
- **Soo sheeg kharashaadka reerka haddii aad doonayso waaxda in ay kuddarto kharashaadkan loogu talagalay Cuntada Aasaasiga ah.** Haddii aadan soo sheegin oo aadan bixinin caddeynta kharashaadkan, markaa waxaad sheegaysaa in aadan doonayn in aad adeegsato kharashaadkan si aad u go'aamiso haddii aad heli karto Cuntada Aasaasiga ah oo dheeraad ah.

Waxyaabaha Ay Tahay In Aad Oggaato (Lacagta Kaashka - TANF)

Marka aad hesho Gargaarka Ku-meelgaarka ah ee Loogu Talagalay Qoysaska Baahan (TANF) waxaad u xilsaareysaa xuquuqaha taageerada carruurta iyo xaaska Qaybta Taakuleynta Carruurta. Tani waxaa ay ka dhigan tahay in DCS ay haysan karto lacagta taakuleynta carruurta ee dib u dhacday (arrears) int aad helayso TANF. DCS waxaa ay kuu soo diri doontaa taakuleyntaada hadda la ururiyay inta aad qaadaneyso TANF.

- **Waa in aad si degdeg ah noogu sheegtaa haddii aad heshay dheefaha ama lacag-bixinnada taakuleynta carruurta e**e ilmaha inta uu ku jiro TANF.
- **Haddii aad joojiso in aad hesho TANF** waa in aad DCS u sheegtaa isbeddelo kasta ee saameeya taakuleynta carruurta, sida haddii ilmaha uusan kula noolayn ama cinwaankaagu uu isbeddelo.
- **Haddii aad hesho TANF**, **waxaad codsan kartaa lacago dheeraad ah** si ay kaaga caawiyaan bixinta kharashaadka guryeynta degdegga ah ee ku-meelgaarka ah.

Waxyaabaha Ay Tahay In Aad Oggaato (Lacagta Kaashka - RCA)

Marka aad hesho Gargaarka Lacagta Kaashka ee Qaxootiga (RCA):

- **Waa in aad tahay qof guursadey ama aan guursan oo aan carruur u joogin guriga.** Waa in aan inoo sheegtaa haddii aad uur qaado ama aad ku khasbanaato in aad daryeesho carruur iyada oo sabab u ah in aad xaq u leedahay barnaamijka dheefta lacagta kaashka ah oo ka duwan.
- **Waxaad xaq u leedahay in aad hesho ilaa laba-iyo-toban (12) bilood oo Gargaarka Kaashka Qaxootiga ah** oo ku saleysan xaaladaada socdaalka iyo taariikhda aad noqotey qof xaq u leh adeegyada iyo barnaamijyada qaxootiga federaalka.
- **Waa in aad ka qaybgasho adeegyada shaqada iyo tababarka** 30 maalmood gudahooda ka-dib helidda gargaarka, kaas oo ay ka mid noqon karaan waxqabadyada kaa caawinaya in aad hesho shaqo ama in aad barato Af-Ingiriis. Waxaa laga yaabaa in aan loo baahnayn in aad ka qaybgasho waxqabadyadan haddii aad leedahay naafonimo ba'an ama daran, ay tahay in aad guriga joogto si aad u daryeesho qaangaar kale oo naafonimo leh, aad tahay 60 sano jir ama ka weyn, ama aad tahay dhibbanaha tacaddiga qoyska.
- **Qayb ka mid ah shuruudaha adeegyada shaqada iyo tababarka ahaan**, waa in aad ka qaybgashaa dhammaan wareysiyada shaqada, aqbasho shaqo soojeedinta macquulka ah (haddii ay tahay mid lid ku ah heshiiska ururka shaqaalaha ee aad xubinka ka tahay mooyaane ama shaqada ay u bannaan tahay sabab la xiriirta khilaaf shaqaale), oo waxaa laga yaabaa in aadan shaqo ka tagin sabab wanaagsan la'aan, oo ah sida aynu go'aaminay.
- **Waxaad xaq u leedahay shaqo habboon iyo adeegyada shaqada iyo tababarka.** Dhammaan shaqooyinka iyo adeegyada shaqada iyo tababarka waa in ay noqdaan kuwo ammaan ah, takoor la'aan ah, oo ay ku jiraan waxqabadyada dhaca gudaha baaxadda qorshaha adeegga waxbarashada / shaqadaada ee gaarka ah iyo in aad si joogto ah u sameyn karto, ka qaybgeli karto saacadaha shaqada ku wanaagsan, iyo in ay dhacdaa gudaha waqti socdaal caqligal ah (aan ka badnayn laba saacadood ama wax degaanka laga aqbali karo. Adeegyada tababarka waxaa ay u badan tahay in ay kuu horseedaan in aad hesho shaqo iyo mushaaraad le'eg ama ka badan mushaarka ugu yar ama waa in aysan si mug leh uga yaraan waxa caadi ahaan lagu bixiyo shaqada la midka ah.
- **Haddii lagaaga baahan yahay in aad aqbasho shaqo soojeedinta ama ka-qaybgalka adeegyada shaqada iyo tababarka,** haddii aad ku guuldareysato in aad sidaa sameyso, gargaarkaaga waa la joojin doonnaa ama waa la dhimi doonnaa. Dhimista waa saddex bilood ka-qaybgal la'aanta ugu horreysa iyo lix bilood ka-qaybgal la'aan kasta ee markaasi ka-dib ah.
- **Waa in aad inoo soo sheegtaa dakhli kasta haddii aad shaqo hesho** kama dambeys 10^{ka} bisha xigta.
- **Haddii aad tahay naafo, indhoole, ama aad ka weyn tahay 65 sano jir**, waxaad heli kartaa RCA adiga oo codsanaya barnaamijyada kale ee gargaarka ee Maamulka Damaannada Bulshada (SSA). Waxaan kaa caawin doonnaa codsashada barnaamijyadaasi. Marka laguu ansixiyo barnaamijka gargaarka ee SSA, dheefahaaga RCA ayaa joogsan doonna.
- **Ma heli kartid RCA** haddii, 30 maalmood gudahooda ka hor codsigaaga aad shaqadaada ka tagto ama diido shaqo soojeedin macquul ah iyada oo aan shaqo wanaagsan jirin.

Xuquuqaha Madaniga iyo Bayaanka Takoor La'aanta

Iyada oo la raacayo sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo xeer-nidaamyada iyo siyaasadaha xuquuqaha madaniga ah ee USDA, USDA, hay'adaha hoos yimaada, xafiisyadeeda, shaqaalaheeda, iyo hay'adaha ka qaybqaata ama maamula barnaamijyada USDA waxaa laga mamnuucay takoorka ku saleysan isirka, midabka, asal ahaan qaranka uu qofku ka soo jeedo, diinta, jinsiga, naafonimo, da'da, xaaladda guurka, xaaladda qoyska/waalidka, dakhliga laga helay barnaamijka gargaarka dadweynaha, aaminsanaanta siyaasadeed, ama aargudashada ama ciqaabta ka dhalata ka qaybgal hore oo la xiriira xuquuqda madaniga ah, barnaamij ama waxqabad kasta ee uu qabto ama maalgeliyo USDA (inkasta oo dhammaan sababaha kor ku xusan aysan si siman u khusayn barnaamij kasta). Xalka iyo muddada kama dambaysta ah ee cabashada la gudbin karo ayaa ku kala duwan barnaamij ama dhacdo kasta.

Shakhsiyaadka naafada ah ee u baahan habab war-isgaarsiineed kale oo loogu talagalay macluumaadka barnaamijka (t.a., Farta Indhoolayaasha ee Braille, daabacad waaweyn, cajalad cod ah, Luuqadda Dhegoolayaasha ee Mareykanka, iwm.) waa in ay la soo xiriiraan gobolka ama hay'ad degaanka ah ee maamusha barnaamijka ama hakala xiriirto USDA Adeegga War-lalinta Isgaarsiinta lambarkan 711 (cod iyo TTY). Intaa waxaa dheer, in macluumaadka barnaamijka lagu heli karo luuqado kale oo aan Af-Ingiriis ahayn.

Si aad u soo gudbiso cabashada takoorka barnaamijka, buuxi Foomka Cabashada Taloorka ee Barnaamijka USDA, AD-3027, laga helo barta internetka ee Sida Loo Soo Gudbiyo Cabashada Takoorka Barnaamijka iyo xafiis USDA kasta ama qor waraaq ku socota USDA ka-dibna waraaqda ku qor dhammaan macluumaadka lagu codsadey foomka. Si aad u codsato nuqulka foomka cabashada, wac (866) 632-9992. U gudbi foomkaaga la buuxiyay ama warqadda ku socota USDA:

1. **Boostada ugu dir**: USDA Food and Nutrition Service, 1320 Braddock Place, Room 334 Alexandria, VA 22314; ama
2. **Email ugu dir**: FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov.

Hay'adan waxay bixisaa fursad loo siman yahay.

Marka aan hoos saxiixo, waxaan sheegayaa in la ii sharxay xuquuqaheyga iyo mas'uuliyadaheyga ee helidda dheefaha DSHS iyo barnaamijyada. Waxaan fahamsanahay haddii aan diido in aan dokumentigan saxiixo in aysan wax saameyn ah ku yeellan doonin xaq-u-yeelashadeyda, laakiin waxaa weli la ii qabsanayaa mas'uuliyadda shuruudaha barnaamijka iyo in la igu soo rogi karo ciqaabo dembiyaadka ama barnaamijka ee igu habboon.

Saxiixa Codsadaha	Taariikhda	Saxiixa La-Codsadaha	Taariikhda

Aqoonsiga ACES Shaqaalaha DSHS: ☐ Diiday in aan saxiixo.